

Car Seats Made Simple



Qaladaadka Caadiga ah

Waxaa dhici karta inaad maqashay in 80% ee gawaarida caruurta si qaldan loo rakibo. Tan waa wax laga argagaxo, laakiin qaladaadka caadiga ah waa kuwo fudud oo si sahlan loo toosin karo.

Dhiibaato: Biinanka suunka celiya si weyn ayay u dabacsanyihiin.

Xallinta: Dhuuji biinanka suunka celiya si ay si waasac ugu ahaadaan cunuga.

Dhibaato: Biinka celiyaha ee xabadka aad ayuu u hooseyaa.

Xallinta: Biinka hoos riix ilaa ay la sinnaadaan kilkaha.

Dhibaato: Kursiga gaariga ee cunugga aad ayuu u dabacsanyahay.

Xallinta: Kursiga waa inusaan ka dhaqaaqin meesha wax ka badan hal inji horay iyo gadaal iyo gees ka gees. Haddii uu sidaa noqdana, qofkale hoos si adag ha ugu riixo inta aad adiga suunka gaariga ku adkaynaysid. Haddii kursiga uu yahay mid horay u jeeda, marka lagu daro adkeyaha u sarreeya ayaa ku caawinaya inuusan nuuxsan.

Dhibaato: Siddooda lagu qaado kursiga ilmaha meel qaldan ayuu ku yaalla.

Xallinta: Kuraasida ilmaha badankooda, siddooda lagu qaado kursiga waa inay booska “hoose” tahay inta uu gaarigu socdo. Laakiin, kuraasida qaarkood siddogga kursiga lagu qaado booskeeda waa ka uu ka duwanaa karaa. Eeg diiwaanka gaarigaaga si aad ku heshid booska saxda ah ee kursigaaga.

Qaladaadka kale waxaa kamid ah in ilamaha ay ku fadhiyaan kursi aan ku habboonayn caruur joogooda ah, ama caruur hortooda eega durbadiiba (ilmahu waa inay raacaan ayaga oo gadaal u jeeda marka ay ku fadhiyaan kursiga illaa ay ka gaaraan ugu yaraan hal sano ama culayskoodu uu yahay 20 rodol).